CHILD CARE LAW CENTER

P.O. Box 9066 • Berkeley, CA
94709 415-558-8005 •
info@childcarelaw.org
www.childcarelaw.org

## Sharciga Oggow: Xanaanada Ilmaha Guriga Dhexdiisa iyo Caymiska

***Shuruud!*** Macluumaadka soo socdaa waxa ay ka hadlayaan masuuliyada xanaanada ilmaha qoyska iyo caymiska mulkiilaha guriga. Xarunta Xeerka Xanaanada Ilmaha ma taageero shirkad caymis ama sharci kasta.

***Digniinta!*** Sharciyada mas'uuliyadda xanaanada ilmaha qoyska waxaa laga yaabaa in loogu yeero "xanaanada carruurta ee qoyska" ama caymiska "xanaanada ilmaha" kaliya. Tan waxay ku xiran tahay shirkadda caymiska.

Wixii macluumaad dheeraad ah, ee la xiriir California Waaxda Caymiska, 1-800-927-4357, https://www.insurance.ca.gov/01-consumers/.

### 1. Daryeel bixiyayaasha daryeelka xanaanada ilmaha ee qoyslka wuxuu dadka uga baahan yahay inay caymis geliyaan guriga xanaanada ilmaha ee qoyska?

**Maya.** Lagaagama baahna inaad hesho caymiska masuuliyada daryeelka ilmaha qoyska si aad ugu maamusho guriga daryeelka ilmaha qoyska sida uu dhigayo sharciga California.[1]

**Laakin** Xarunta Sharciga Xannaanada Ilmaha *waxay si xoogan* ay ku talinayaan inaad gasho caymiska xannaanada ilmaha ee qoyska.

Hisa hoos timaada sharciga waafaqsan, bixiyayaasha daryeelka xanaanada ilmaha ee qoyslka *waa*:

- inay iibsadaan caymiska xannaanada ilmaha ee qoyska oo bixinaya waxyeelooyinka ilmaha la hayo "kalyantiga iyo martida" caymis gaaraya ilaa $100,000 dhacdo kasta iyo $300,000 wadar ahaan;
- Iibso caddayn dammaanad oo gaaraysa ilaa $300,000 wadar ahaan; **ama**
- Feelka geli Affideefit Quseeya Caymiska Mas'uuliyadda ee Xanaanada Ilmaha Guriga Dhexdiisa Guryaha (Foomka Affideefitka LIC 282) oo ay saxiixeen waalidka iyo masuulka xannaanada ee ilmaha ay hayaan. [2]

### 2. Maxay yihiin manfacyada laga helayo in la galo caymiska mas'uuliyadda xannaanada ilmaha ee qoyska?

Caymiska mas'uuliyadda xannaanada ilmaha ee qoyska ayaa kaa caawin kara inaad jeebga ka bixiso haddii lagugu dacweeyo dhacdo la xiriirta waxa ka dhaca xanaanada ilmaha ee gurigaaga dhexdiisa. Sidoo kale waxaa kaloo laga yaabaa inay kaa bixiyaan haddii ay dhacaan shillal kale ama dhacdooyinka kale oo ay ka dhacaan xanaanada ilmaha ee gurigaaga dhexdiisa.

Sidoo kale shirkaddaha caymiska waxay qabaan qareeno. Haddii lagugu dacweeyo dhacdo la xiriirta xanaanada ilmaha gurigaaga dhexdiisa ah, caymiska noocan ah ayaa kaa caawinaya inay bixiyaan lacagta qareenka ee adiga ku matalaya.

Wixii macluumaad oo dheeri ah oo ku saabsan caymiska iyo manfacyada ay leeyihiin, Waaxda Caymiska California kala xiriir 1-800-927-4357 iyo https://www.insurance.ca.gov/01-macaamiisha/.

### 3. Ka warran haddii aan *galin* caymiska mas'uuliyadda xannaanada ilmaha ee qoyska ama caddayn?

Hadii *aadan* galin caymiska mas'uuliyadda xannaanada ilmaha ee qoyska, waa *inaad*:

- Ku wargelisaa dhammaan waalidiinta iyo mas'uuliyiinta barnaamijkaaga inaadan caymis ku jirin,
- Waalid kasta iyo mas'uul kasta ha kuu saxiixeen Affideefit Quseeya Caymiska Mas'uuliyadda ee Xanaanada Ilmaha Guriga Dhexdiisa Guryaha (Foomka Affideefitka LIC 282), iyo
- Foonka 282 Affideefitka oo saxiixan geli feelka Shatiga si aad u hubiso inta lagu jiro kormeerka sanadlaha ah. [3]

Foormka 282 ee Affadeefitka ka la soo bax:

- Af Ingiriis halkan, **iyo**
- Af Isbaaanish halkan.

***Digniinta!*** Bixiyaha Daryeelka Caruurta ee Qoyska *ma* tusi karo Foomamka Affideefit LIC 282 oo buuxa Mulkiilaha gurigooda, Ururka Milkiilayaasha Guriga (HOA), ama kuwa kale.4

**4. Foomamka Affideefitka LIC 282 oo saxiixan ma iga badbaadinayaa in la idacweeyo?**

**Maya.** Foomamka Affideefitka LIC 282 oo saxiixan *kaa ma* ilaalinayo inuu kaa ilaaliyo in lagu dacweeyo. Saxiixida Foomka, waalidiinta iyo mas'uuliyiinta ilmaha way og yihiin inaadan haysan caymiska mas'uuliyadda xannaanada ilmaha ee qoyska. [5]

Haddii aad ijaar ku jirto, Section B ee Foomku waxay u sheegaysaa qoysaska in caymiska ee aad ku jirto mulkiilaha, Ururka Mulkiilayaasha Guryaha (HOA), ama bixiyayaasha guriyeynta kale *ma bixinayo ma* daboolayo daryeelka - caruurta la xiriira. [6]

Qoysasku way diidi karaan inay saxiixaan foomka dhaarta oo waxay dooran karaan barnaamijka daryeelka caymiska mas'uuliyadda xannaanada ilmaha ee qoyska bedelkeed.

**5. Haddii aan ahay qor guri ijaar ugu jira, ma u baahan nahay inaan helo caymiska mas'uuliyadda xannaanada ilmaha ee qoyska?**

**Maya**. Haddii aad tahay qof guri ijaar ugu jira iyo bixiyayaasha daryeelka xanaanada ilmaha ee qoyslka, lagaaga ma baahna inaad hesho caymiska mas'uuliyadda xannaanada ilmaha ee qoyska. [7]

**Laakin** Xarunta Sharciga Xannaanada Ilmaha *wuxuu si xoogan* kugula tallinayaan inaad gasho caymiska xannaanada ilmaha ee qoyska.

**Weli**, kirayste ahaan, adiga *waa in*:
- aad iibsataa caymiska xannaanada ilmaha ee qoyska oo bixinaya waxyeelooyinka ilmaha la hayo "kalyantiga iyo martida" caymis gaaraya ilaa $100,000 dhacdo kasta iyo $300,000 wadar ahaan;
- Iibso caddayn dammaanad oo gaaraysa ilaa $300,000 wadar ahaan;

**ama**

- Feelka geli [Affideefit Quseeya Caymiska Mas'uuliyadda ee Xanaanada Ilmaha Guriga Dhexdiisa Guryaha] (Foomka Affideefitka LIC 282) oo ay saxiixeen waalidka iyo masuulka xannaanada ee ilmaha ay hayaan. [8]

Hadii *aadan* galin caymiska mas'uuliyadda xannaanada ilmaha ee qoyska, waa inaad:
- Dhammaan waalidiinta iyo mas'uuliyiinta oo dhan u sheegKu wargelisaa dhammaan waalidiinta iyo mas'uuliyiinta barnaamijkaaga inaadan caymis ku jirin,

- Waalid kasta iyo mas'uul kasta ha kuu saxiixeen Affideefit Quseeya Caymiska Mas'uuliyadda ee Xanaanada Ilmaha Guriga Dhexdiisa Guryaha (Foomka Affideefitka LIC 282), **iyo**
- Foonka 282 Affideefitka oo saxiixan geli feelka Shatiga si aad u hubiso inta lagu jiro kormeerka sanadlaha ah. [9]

Haddii aad ijaar ku jirto, Section B ee Foomku waxay u sheegaysaa qoysaska in caymiska ee aad ku jirto mulkiilaha, Ururka Mulkiilayaasha Guryaha (HOA), ama bixiyayaasha guriyeynta kale ma bixinayo *ma daboolayo* daryeelka caruurta la xiriira. [10]

Foormka 282 ee Affadeefitka ka la soo bax:
- Af Ingiriis halkan, **iyo**
- Af Isbaanish halkan.

***Digniinta!*** Bixiyaha Daryeelka Caruurta ee Qoyska *ma* tusi karo Foomamka Affideefit LIC 282 oo buuxa Mulkiilaha gurigooda, HOA, ama kuwa kale. [11]

**6. Milkiilayaasha guryaha, milkiilayaasha guryaha, Ururada Mulkiilayaasha Guryaha (HOAs), ama bixiyeyaasha kale ee guryaynta ma u baahan karaan in kiraystayaasha helaan caymiska mas'uuliyadda xannaanada ilmaha ee qoyska?**

**Maya** Sida uu qabo sharciga California, milkiilayaasha guryaha, mulkiilayaasha, HOAs, iyo bixiyayaasha guriyeynta kale *uga ma* baahan karaan in kiraystayaasha ay galaan caymiska mas'uuliyadda daryeelka ilmaha qoyska. [12]

Sababaha qaar ee sharcigan waxaa ka mid ah:
- Dadka xanaanada ilmaha guriga dhexdiisa ku bixiya waxay dhib ku qabaan inay helaan caymiska masuuliyadeed;
- Shirkadaha caymisyada qaarkood waxay dadka xanaanada ilmaha guriga dhexdiisa ku haysta ay ku soo rogaan xannibaadyo sharci darro ah;
- Milkiilayaasha guryaha, milkiilayaasha guryaha, HOAs, iyo bixiyeyaasha kale ee guryaha *ma* xaddidi karaan ama ku ma waajibin karaan xanaanada ilmaha guriga dhexdiisa qoyska ku haya;13 **iyo**
- Xanaanada ilmaha guriga dhexdiisa ilmaha ku haysta waxaa loo tixgaliyaa isticmaalka guryaha ee la deggan yahay, ee ma aha isticmaalka ganacsi ee guryaha dhexdiisa ah. . [14]

***Digniinta!*** Milkiilayaasha guryaha, HOAs, iyo bixiyeyaasha kale ee guryaha qaarkood waxay kiraystayaasha guryaha ay uga baahan yihiin inay caymis galaan. Haddii aad guriga ka kiraysanayso qof sharcigan u degsan, waa in guriga aad ijaaranayso caymis gashataa. Tan waxaa sababay sharcigu wuxuu khuseeyaa dhammaan kiraystayaasha, oo ma aha oo kaliya kiraystayaasha guryaha ku leh xanaanada ilmaha guriga dhexdiisa.

7. **Haddii anigu aanan ahayn qof guri u ijaaran, ma inaan ku daraa mulkiilahayga guriga, HOA-ga, ama bixiyayaasha guriyeynta kale ma inaan ku daraa caymiska caymiskayga mas'uuliyadda xannaanada ilmaha ee qoyska?**

**Haa,** laakiin *kaliya haddii* dhammaan shuruudahan oo dhan la buuxiyey:

- Horayba aad u la'hayd ama hesho caymiska mas'uuliyadda xannaanada ilmaha ee qoyska ama boond;
- Bixiyahaaga guriga uu ku waydiisto in lagu daro caymiskaaga guriga ama boond *qaab qoraal ahaan ah*;
- Caymiskaaga guriga ama boond lagugu yiri waa lagaa joojinayaa ama dib loo ma cusboonaysiin doono haddii bixiyahaaga guriga lagu daro caymiskaaga guriga ama boond; **iyo**
- Bixiyaha guriyeyntaada uu kaa aqbalo inuu bixiyo kharash kasta oo dheeraad ah si loogu daro caysmiska guriga ama boondada. [15]

8. **Shirkadda caymisku way kaa joojin karaan ama way kuu diidi karaan inay kuu cusboonaysiiyaan caymiska guriga sababtoo ah qofka caymiska ku qoran ayaa ah ama qofka u kiraysan bixiyayaasha daryeelka xanaanada ilmaha ee qoyslka?**

**Maya** Shirkad caymis *kaa ma* kansali karaan ama kuu ma diidi karaan inay kuu cusboonaysiiyaan caymiska guriga sabab la xiriira qofka caymiska ku qoran:

- Wuxuu ka shaqaystaa xanaanada ilmaha oo guriga dhexdiisa lagu qabto darteed, **ama**
- Wuxuu guriga ka ijaaray qof xanaanada ilmaha guriga dhexdiisa ku haysta.16

Shirkad caymiska ayaa *kaliya* caymiska ka kansali karta milkiilaha guriga sababo gaar ah awgood, sida:

- Qofka caymiska ku qoran oo bixin waayo lacagta caymiska ee bishii;
- Qofka caymiska ku qoran oo galay fal qiyaano, ama wax xaqiiq ah been ka sheegay;
- Qaabka dhismaha ee guriga waxa laga beddelo taas oo kordhisay khatarraha guriga; **ama**
- Shirkadu oo hadda wixii ka dambeeya joojisa caymiska guriga. [17]

Goorta shirkadda caymiska ay *kansasho* caymiska guriga, waa in ay:

1. Boostada ugu soo dirtaa qofka caymiska ku qornaa oo ayna ugu dirtaa cinwaanka ugu dambeeyay ee ay ka hayso,
2. Iyagoo ku dhahaya in caymiska la joojin doono iyo sababta ay uga joojinayso,
3. Ugu yaraan 20 maalmood ka hor inta aysan caymiska ka joojin. [18]

***Digniinta!*** Shirkadaha caymiska qaarkood waa in ay qofka caymiska ku qoran u ku wargeliyaan in *ka badan* 20 maalmood ka hor intaysan caymiska ka joojin. Iska hubi qaanuunka caymiskaaga wixii macluumaad dheeraad ah.

Goorta shirkadda caymiska *aysan cusboonaysiinayn* shirkadda caymiska gurigu waa in ay:

1. Boostada ugu soo dirtaa qofka caymiska ku qornaa oo ayna ugu dirtaa cinwaanka ugu dambeeyay ee ay ka hayso,
2. U sheegtaa sababta(sababaha) gaarka ah ee aysan dib ugu cusboonaysiin,
3. Ugu yaraan 75 maalmood ka hor intaysan ka dhicin caymiska.19

9. **Maxaa dhacaya haddii qof uu ku xad-gudbo xuquuqdeyda ku lugta leh caymiska?**

Haddii qof uu ku xad-gudbo xuquuqdeyda ku lugta leh caymiska:

- Warqadda xogta xaqiiqda tus.
- Xarunta Xeerka Daryeelka Carruurta kala xiriir (415)558-8005 ext. 101, iyo www.childcarelaw.org/help.
- Qareen bartan ka raadi www.lawhelpca.org, ama la xiriir ururka qareenada ee degmadaada ama Ururka Qareenada Gobolka California si ay kuu gudbiyaan.
- Cabasho u gudbi Waaxda Caymiska ee California bartooda waa https://calcivilrights.ca.gov/ComplaintPro c ess/.
- Cabasho u gudbi Waaxda Xuquuqda Aadanaha bartooda waa https://calcivilrights.ca.gov/ComplaintPro c ess/. Waxaan kugula talineynaa inaad la xiriirto Xarunta Sharciga Xannaanada Carruurta si aan kuuu sharaxno hanaanka cabashada.
- Wax ka baro xuquuqdaada caymiskaaga ee Waaxda Caymiska Guryaha la Dego: Buug-gacmeedka mulkiilayaasha iyo buug-gacmeedka Kiraystaha halkan ka kala soo bax:
  - Af Ingiriis,
  - Af Isbaanish, **iyo**
  - Af Hmong.

10. **Waa maxay "bixiyayaasha daryeelka xanaanada ilmaha ee qoyslka?"**

“Bixiyayaasha daryeelka xanaanada ilmaha ee qoyslka" waxay guriga ku bixiyaan adeeg xanaano ilmo oo gurigood ku bixiyaan, guri u kiraysan ama guri ay iyagu iska leeyihiin.

Waxay qabtaan barnaamij daryeel ilmo oo loogu yeero "xanaanada ilmaha guriga dhexdiisa."20

Gobolkan Kalifoorniya, Waaxda Adeegyada Bulshada ee Kaliforniya ee Qaybta Shati bixinta Daryeelka Bulshada iyo waaxaha dab-damiska ee deegaanka kaliya ayaa bixin kara shatiga oo meel marin karta xeerarka xanaanada ilmaha guriga dhexdiisa. [21]

Dowladda hoose, degmo degmooyinka (counties), iyo bixiyeyaasha guryaha, sida mulkiilayaasha, *ma* sharciyayn karaan ama qawaanniin u ma soo saari karaan xanaanada ilmaha guriga dhexdiisa. [22]

Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo Shatibixinta Daryeelka Jaaliyadda, https://www.cdss.ca.gov/inforesources/child-care-licensing.

**11. Halkeen ka heli karaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan mas'uuliyadda daryeelka ilmaha qoyska iyo caymiska mulkiilaha guriga?**

La xiriir:

- Waaxda Caymiska ee Kalifoorniya 1-800-927-4357 ama booqo https://www.insurance.ca.gov/.
- Ilahaaga maxaliga iyo wakaalada Gudbinta ee Deegaankaaga www.rrnetwork.org.

**© Child Care Law Center 2024**
Waxaa qoray qareennada jooga Xarunta Xeerka Daryeelka Carruurta. Si aad u hesho ogolaansho ah inaad nuqul ka sameyso, gudbiso ama la wadaagto macluumaadkan, iimeel noogu soo dir: info@childcarelaw.org

**Macluumaad *Sharci* – Oo Ma aha Talo *Sharci*.** Daabacaadan waxaa loogu talagaly inay kuu fidiso macluumaad sharci ah; maaha talo sharci. Xarunta Xannaanada Carruurta maaha qareenkaaga. Sharcigu inta badan wuu is-isbedelaa. Wixii talo ah ee ku saabsan xaaladdaada gaarka ah, qareen la xiriir.

**Dhammaad:** Qoraallada hoose waxaa laga soo xirtay linkiga sharciyada California iyo xuquuqahaaga mawduucan quseeya. Iska akhri iyo/ama la xiriir maktabadda sharciga deegaankaaga. Waxaa dhici karta inay kaa caawiyaan inaad fahamto sharciyada.

---

**Dhammaad:**

1 Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.531(a).

2 Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.531(a).

3 Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.531(a).

4 *Fiiri* Cal. Xeerka Xeerarka., magaca. 22 § 101221(c) (Magacyada ilmaha iyo qoyska ayaa waxaa loo texgeliyaa xog asturan. Qaybta 101221 waxay u baahan tahay in bixiyayaasha daryeelka xanaanada ilmaha ee qoyslka ay xifdiyaan dhammaan macluumaadka iyo diiwaangelinta quseysa xogta carruurta oo dhan.).

5 Cal. Waaxda Soc. Serv., Cmty. Qeebta Shatiga Daryeelka, LIC 282, Affideefit ama Caddayn ku Saabsan Caymiska Xanaanada Ilmaha Guriga Dhexdiisa (2008).

6 Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.531(a).

7 *Fiiri* Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.531(a); *sidoo kale arag*, Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.41(a)-(c).

8 Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.531(a).

9 Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.531(a).

10 Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.531(a).

11 *Fiiri* Cal. Xeerka Xeerarka., magaca. 22 § 101221(c) (Magacyada ilmaha iyo qoyska ayaa waxaa loo texgeliyaa xog asturan. Qaybta 101221 waxay u baahan tahay in bixiyayaasha daryeelka xanaanada ilmaha ee qoyslka ay xifdiyaan dhammaan macluumaadka iyo diiwaangelinta quseysa xogta carruurta oo dhan.).

12 *Fiiri* Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.531(a); *sidoo kale arag*, Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.41(a)-(c).

13 Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.41(a)-(c).

14 Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada §§ 1597.42, 1597.43(a), 1597.45(a).

15 Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.531(b) (Xeerarkan caymis ee isku wada midka ah ayaa lagu dabaqaa goorta xanaanada ilmaha guriga dhexdiisa ilmo lagu hayo kaas oo lala wadaago booska uu ka shaqeeyo Ururka Milkiilayaasha Guryaha.).

16 Cal. Ins. Xeerka § 676.1(a)-(b). *Sidoo kale fiiri*, Cal. Ins. Xeerka § 676 ("Haddii caymiska guriga ee mulkiilaha gurigu ku jiray ugu yaraan 60 maalmood, ama ay tahay caymis la cusboonaysiiyay, waxaa dhici karta in la joojiyay ama kaliya dib loogu cusboonaysiin waayay sababo la xiriira lacagta bisha oo aan la bixin kaliya, qofka caymiska ku jiray lagu helay dambi, qiyaano, falal daayacaad ama wax ku darid la'aan ama isbeddel dhismo ee guriga caymiska ku jiray darteed kaas oo dhalisay in guriga noqdo mid la canshuuri waayo." Furida la furo xanaanada ilmaha guriga dhexdiisa ahloo ma texgeliyo sida "isbeddel qaabka guriga" kansalida ama cusboonaysiin la'aanta.). *Sidoo kale fiiri*, Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.41(a)-(c).

17 Cal. Ins. Xeerka § 676.1(a). *Sidoo kale fiiri*, Cal. Ins. Xeerka § 676.

18 Cal. Ins. Xeerka § 662. *Sidoo kale fiiri*, Ricardo Lara, Guddoomiyaha Caymiska, Waaxda Caymiska ee California, *Caymiska Guryaha: Milkiilayaasha iyo Kiraystayaasha Guriga* (2021), https://www.insurance.ca.gov/flipbook/residential2020/22/.

19 Cal. Ins. Xeerka § 678 (a) (B), (c). *Sidoo kale fiiri*, Ricardo Lara, Guddoomiyaha Caymiska, Waaxda Caymiska ee California, *Caymiska Guryaha: Milkiilayaasha iyo Kiraystayaasha Guriga* (2021), https://www.insurance.ca.gov/flipbook/residential2020/22/.

20 Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada §§ 1596.78, 1597.44, 1597.465. *Sidoo kale fiiri*, Waaxda Adeegyada Bulshada ee California, Qaybta Shatiga Daryeelka Bulshada, https://www.cdss.ca.gov/inforesources/child-care-licensing/resources-for-parents (booqashadii ugu dambeysay ahayd 25ka Abriil, 2024).

21 *Fiiri* Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.40 ("Sharciyada madaniga, qawaaniinta, ama xeerarka maxalliga ah waa inaysan si toos ah ama si dadban u mamnuucin ama u xaddidin isticmaalka xarunta inuu guriga noqdo sidii guri daryeel carruur in qoys uu xannaano ku bixo..."). *Sidoo kale fiiri*, Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.41(a)-(c).

22 Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.41(a)-(c), (e). *Sidoo kale fiiri*, Cal. Xeerka Caafimaadka & Badbaadada § 1597.45(a)-(c).